



SHAQADA: Barnaamijka Qorsheynta iyo Taageerada Dhiiragelinta Shaqada (WIPA)

Hay'adda Xuquuqda Naafada ee Ohio (Disability Rights Ohio) waxay mar labaad bixinayaan la-talinta macaashyada, adeeg bilaash ah oo loogu talagalay dadka qaata macaashka Sugnaanta Bulshada iyadoo maadaama ay yihiin dad naafo ah iyada oo loo marayo Maamulka Sugnaanta Bulshada ee Barnaamijka Qorsheynta iyo Taageerada Dhiiragelinta Shaqada (WIPA).

Maamulka Sugnaanta Bulshada (The Social Security Administration) waxay bixiyaan "dhiiragelin shaqo" oo loogu talagalay inuu dadka ka caawiyo ka gudubka helitaanka jeeggaga loogu talagalay dadka si ay lacag ku kasbadaan iyadoo loo marayo shaqada. La-talinta macaashyada ayaa leh yool lagu yaraynayo ama looga takhalusayo ku tiirsanaanta qofka macaashyada dawladda, iyadoo la xalinayo cabashooyinka ay qabaan ee wax looga qabanayo arrimaha sida sii socoshada macaashyada daryeelka caafimaadka.

Isku-duwayaasha Dhiiragelinta Shaqo ee La Xaqijiyyay (CWICs) waxay bixiyaan la-talin la gaar yeelay si ay dadka uga caawiyaan inay isticmaalaan magdhowgan shaqo ayna u fahmaan inay saamayn ku leeyihiin shaqada qofka.


Hay'adda Xuquuqda Naafada ee Ohio waxay bixisa barnaamijka WIPA ee laga helo 31 ka mid ah 88 degmooyin ee Ohio, sida ku qoran liiska ku yaala dhinaca dambe ee boggan. Laba hay'adood oo kale, Ururka Caawinaada Sharciga ee Cincinnati iyo Karunta Beddelka Xirfadaha, waxay kormeeraan barnaamijyada ka dhacaya gobolada kale. Maclumaadka xiriirkooda waxaa lagu bixiyay qaybta ka hooseysa khariiddada.

Si aad u hesho maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka WIPA, fadlan kala xiriir waaxda shaqaale qaadashada ee Hay'adda Xuquuqda Naafada ee Ohio lambarka 800-282-9181, TTY 614-728-2553, Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxaysa 9 subaxnimo iyo 4 galabnimo.



Dukumeentigan waxaa lagu maalgelinayaa heshiiska wadajir ee Sugnaanta Bulshada. Inkastoo Sugnaanta Bulshada dib u eegeen dukumentigan inuu saxsan yahay, ma aha mid ka dhigan xiriir rasmi ah ee Sugnaanta Bulshada.

Mashruucyada Barnaamijka Qorsheynta iyo Taageerada Dhiiragelinta Shaqada
 (WIPA) ee ka jira Ohio ee Hoos Yimaada Maamulka Sugnaanta Bulshada
 Xeerka Shaqo Helida iyo Magdhowga Shaqada ee 1999



Bulshada Gargaarka Sharciga ee Cincinnati

215 E. 9th St., Suite 200
 Cincinnati, OH 45202
 513-241-9400 ama 800-582-2682
 Fakis 513-241-0047
lascinti.org

Southeast Inc/COVA

3770 N. High Street
 Columbus, OH 43214
 (614) 294-7117 — cod
 (614) 294-7443 — fakisaka
www.cova.org